

Asylum Support Partnership

help and advice



October 2010

Somali

Kaadhka bixinta 'Azure' ee taageera Qaybta 4 (Section 4)

Haddii lagu siiyo taageerada Qaybta 4 waxa aad xaq u leedahay hoy iyo taageero todobaadle ah oo dhan £35. Waxa taageeradaada todobaadka lagu siin doonaa iyada oo la adeegsanayo kaadh loo yaqaano kaadhka bixinta 'Azure'.

Hay'ad la yidhaahdo Sodexho ayaa habka bixinta u maamulasha Hay'adda Xuduudka ee UK (UK Border Agency - UKBA). Kaadhka waxa loo isticmaalayaa in lagu iibsado cuntada, alaabta nadaafadda ama musqusha, dhar, alaabooyinka waxa lagu nadiifiyo, ama alaab kasta oo laga iibiyo dukaano ciyaman ama gaar ah oo aqbalay inay isticmaalaan kaadhka. Kaadhka 'Azure' kuma iibsan kartid kaadhahka hadyadeed, batrool iyo diisal.

Sidee baad ku heli doontaa kaadhka?

Kaadhkaaga bixinta ee kuu gaarka ah waxa ku siin doona bixiyaha hoygaaga ka dib kala-firdhinta. Haddii aan isla markiiba lagu siin kaadhkaaga waa in markaas lagu siiyo foorjaro aad wax kaga iibsatid dukaanada.

Sidee buu u shaqeeyaa?

Xisaabta kaadhkaaga waxa si otomaatig ah loogu shubaa gunadaada taageerada ee todobaadlaha ah marka ay tahay habeen-badhka Axadda. Waxa aad ka dib awoodi doontaa inaad kaadhka la tagtid dukaano gaar ah si aad u iibsatid cunto, alaabta nadaafadda ama musqusha ama dhar u dhigma qiimaha gunadaada todobaadlaha ah. Uma baahnid inaad dhamaan gunadaada ku kharashgareysid hal dukaan hal mar.

Shaqaalaha dukaanka ayaa galin doona kaadhkaaga mishiinka kaadhahka akhriya waxana qadarka lacagta ah ee u dhigma alaabta aad iibsatay laga jari doonaa kaadhkaaga taasoo si toos loogu wareejin doono dukaanka.

Fadlan u fiirso in:

- **Haddii aad tahay qof weyn oo kali ah** ma awoodi doontid inaad qadaro lacag ah o waaweyn ku kaydsatid kaadhkaaga bixinta. Wakhtigan haddii gunada todobaadlaha ah wax kaaga soo hadheen **kaliya qadarada aanad kharashgareyn ee ah ilaa £5** ayaa lagu wareegin doona gunadaada todobaadlaha ah ee ku xigta marka la cusbooneysiinayo xisaabta. Wixii kale ee ah lacag hadhay waa lagaa ceshan doonaa.
- Ma awoodi doontid inaad iibsatid alaab lacagteedu tahay qadar ka badan waxa kuugu jira kaadhkaaga. Haddii taasi dhacdo waxa laga yaabaa inaan dukaanku kuu oggalaan inaad qaadatid alaabta aad isku dayaysay inaad iibsatid. Si aad uga baxsatid in taasi kugu dhacdo fadlan hubi in qadarka lacagta ah ee kuugu hadhsan kaadhkaaga uu ka badan yahay ama u dhigmo kharashka badeecadda aad rabtid inaad iibsatid **ka hor** inta aanad galin kaadhka mishiinka akhriya kaadhahka.
- Gudaha dukaanada ha isticmaalin adeegga adigu isu adeeg ee aad shaqaale la'aan iskaga bixinaysid kharashka alaabta aad iibsatay; adeegga noocaas ah dhamaantiis looguma talogalin in lagu isticmaalo kaadhka Azure.

Oraalo kale oo la tarjumay ayaa laga heli karaa <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Asylum Support Partnership is a partnership project hosted by the British Refugee Council
British Refugee Council, (commonly called the Refugee Council) is a company limited by guarantee registered in England and Wales, [No 2727514] and a registered charity, [No 1014576].
Registered office: 240-250 Ferndale Road, London SW9 8BB, United Kingdom, VAT no: 936 519 988



- Ha weydiisan dukaanada inay 'lacag kaash ah' ku siiyaan ('cash back' - lacag celin).
- **Kaadhka kuma isticmaali kartid bangi ama mishiinka bixiya kaashka.** Haddii aad isku daydid inaad kaadhkaaga ku isticmaashid mishiinka kaashka waxa dhici doonta inaan kaadhku shaqeynin mana awoodi doontid inaad ku isticmaashid dukaanada ilaa markale ay dib u hawgaliso UKBA.

Sidee baan ku hubin karaa qadarka lacagta ah ee iigu jira kaadhka?

Si aad u hubisid inta lacag kuugu jirta kaadhka waxa aad wici kartaa:

**Khadka Weydiinta Baaqiga Kaadhka Azure
(Card Balance Enquiry Line) oo ah Teleefonka: 0800 028 5364**

- Wicistu waa bilaash marka laga soo waco layn dhulka ah laakiin ma aha bilaash marka laga soo waco teleefonka gacanta ama moobil.
- Waxa aad u baahan doontaa inaad galisid lambarka kaadhkaaga bixinta ee Azure.
- Fariimaha lagu siinayo dhamaantood waxa lagu bixinayaa Ingiriisi, mana jiro adeeg turjubaan, sidaa daraadeed fadlan qof weydiiso inuu ku gargaaro haddii aanad fahmaynin fariimaha.

Waa kuwee dukaanada aan ku isticmaali karo kaadhka?

Waxa aad kaadhka ku isticmaali kartaa: Tesco, Asda, Sainsbury's, Morrisons, The Co-Operative, Peacocks iyo Boots.



Waa inaad weydiisid bixiyaha hoygaaga wixii ku saabsan warka ugu dambeeyay ee ku saabsan dukaanada degmada iyo wadanka ee aqbala kaadhka.

Ayaan la xidhiidhaa haddii dhibaato i haysato?

- **Haddii kaadhkaagu aanu shaqeynaynin.** Khad gargaar ayaa loo sameeyay dhibaatooyinka kaadhka:
Khadka Gargaarka Macmiilka ee Magangalyo-doonka ee Sodexo (Asylum Seekers Customer Helpline) oo ah Teleefonka: 01276 687 098 (furan 9 subax ilaa 5 galab)
- **Haddii dhibaato kaa haysato qadarka taageeradaada todobaadlaha ah ama lacag-bixinno dheeraad ah** la xidhiidhka Kooxdaada Gobolka ee UKBA ama kooxda Qaybta 4.
- **Haddii kaadhkaagu lumay ama la xaday.** Waa inaad u sheegtid bixiyaha hoygaaga kaasoo ku siin doona talo oo awoodi doona inuu bixiyo taageero degdeg ah.
- **Haddii dhibaatooyin kaa haystaan dukaanka:**
Dhamaan dukaanada ku jira liiska sare iyo kuwo cusub oo kasta ee UKBA ama bixiyaha hoygaaga kuu sheegay waa inay aqbalaan kaadhkaaga.
Waa in shaqaalaha dukaanka la siiyay war ku saabsan kaadhka iyo in aanay u baahnayn saxeex, lambar aqoonsi shakhsi (PIN) ama dukumenti aqoonsi oo kale si loo isticmaalo.
Haddii shaqaaluhu diidaan inay aqbalaan khaadhkaaga, waa inaad weydiisatid inay la xidhiidhaan maamulahooda, si taas loogu xaqiijiyo ama weydiiso maamulaha inuu la xidhiidho lambarka adeegga macmiilka ee Sodexo si loogu xaqiijiyo.
Haddii kaadhkaaga la galiyay mishiinka akhriya kaadhka, laakiin dukaanku kuu diido inaad qaadatid alaabta, weydiiso risiidh muujinaya in iibka la joojiyay.
Hubi baaqigaaga: waxa laga yaabaa in lacagta lagala baxay kaadhkaaga.

Haddii lacagta lagala baxay kaadhkaaga laakiin aan lagu oggalaan inaad qaadatid alaabta, waa in qadarka lagala baxay si otomaatig ah loogu celiyo kaadhkaaga gudaha 48 saacadood. Haddii aad qadarka lacagta ah si dhakhso ah ugu baahan tahay ama qadarka lacagta ah aan lagu celin kaadhkaaga ka dib 48 saacadood la xidhiidh hay'adda qaxootiga ee degmadaada.

Si aad u heshid war ama gargaar dheeraad ah la xidhiidh mid ka mid ah hay'adaha qaxootiga ee gobolkaaga.

Asylum Support Partnership consists of:

North of England Refugee Service, charity number: 1091200 www.refugee.org.uk

Refugee Action, charity number: 283660 www.refugee-action.org.uk

Refugee Council, charity number: 1014576 www.refugeecouncil.org.uk

Scottish Refugee Council, charity number: SC008639 www.scottishrefugeecouncil.org.uk

Welsh Refugee Council, charity number: 1102449 www.welshrefugeecouncil.org